

HENNEPIN COUNTY

MINNESOTA

ARAGTIDA, HIMILADA IYO UJEEDOOYINKA XARUNTA XABSIGA DHALIN YARADA:

ARAGTIDA:

Anaga waxaan aragnaa in dagganeyaasha la siiyo jawi ammaan ah oo sugar halkaas oo lagu dhiiri geliyo in ay sameyaan xulasho mas'uul ah marka ay ku soo noqdaan bulshada.

HIMILADA:

In la hawl geliyo xarun ammaan ah oo sugar oo lagu haayo dhalin yarada inta ay sugayaan go'aanka Maxkamadda iyo/ama meeleynta.

UJEEDOOYINKA:

In la kantaroolo gelitaanka si loo hubsado in xarunta loo ogalaado dhalin yarada la kulanta nidaamka u dagsan xabsiga oo keliya.

In la suurtogeliyo meel lagu haayo oo sugar si loo hubsado in dagganeyaasha ku sugar yahiin nabad lana heli karo marka loo baahdo meeleynta maxkamadda.

In la bixiyo barnaamij waxtar leh oo ku habboon da'da iyo hawlaha la siiyo kooxaha iyo shakhsiyadka si loogu dhiiri geliyo in ay si mas'uul ah wax u doortaan.

XUQUUQDA DAGGANAHAA INTA INTA UU KU SUGAN YAAY

XARUNTA XABSIGA DHALIN YARADA:

- Dagganeyaasha waxay xaq u leeyahiin in la siiyo hoggaaminta shaqaalaha, taageero iyo kormeer.
- Dagganeyaasha waxay xaq u leeyahiin in aan lagu xadgudbin, dayacin, la xumeynin, ama in aan sinna looga fa'iideysanin.
- Dagganeyaasha waxay ilaa xad mas'uul ah xaq u leeyahiin asturnaanta, hase ahatee taasi waa in aysan shaqaalaha ka joojinin in ay dhowraan ammaankooda.
- Dagganeyaasha waxay xaq u leeyahiin in loola dhaqmo si xushmad ku jirto.
- Dagganeyaasha waxay xaq u leeyahiin in loola dhaqmo isla sida loola dhaqmo dadka kale, qofkuu rabo ha ahaado, sida ay u muuqdaan, ama waxa ay aaminsan yahiin.
- Dagganeyaasha waxay xaq u leeyahiin in ay sharfaan hidahooda iyo in ay ku dhaqmaan diintooda, taasoo hoos imaan doonto tilmaamaha u dagsan xabsiga.
- Dagganeyaasha waxay xaq u leeyahiin in ay arkaan kalkaaliye iyo in la siiyo daryeelka caafimaadka haddii loo baahdo.
- Dagganeyaasha waxay xaq u leeyahiin cunto nafaqo leh, labis ku habboon iyo qol u gaar ah.
- Dagganeyaasha waxay xaq u leeyahiin in ay joogaan meel nadiif ah oo ammaan ah.
- Dagganeyaasha waxay xaq u leeyahiin in ay tagaan dugsi.
- Dagganeyaasha waxay xaq u leeyahiin isgaarsiin macquul ah iyo booqashada waalidiintooda/ilaaliyeyeashooda waqtiyada saacadaha booqashada.
- Dagganeyaasha waxay xaq u leeyahiin in ay wacaan qareenkooda, sarkaalka tijaabada ama shaqaalaha kiiska; waxay booqan karaan waqtii kasta. Qaar ka mid ah dadka kale ee waaweyn, sida la-taliyaha diinta, waxaa loo baahan yahay in la ogolaado si ay u soo booqdaan.
- Dagganeyaasha waxay xaq u leeyahiin in ay ku qabesyaan tubada hal mar maalin kasta. Waa la siin doonaa alaabta (saabuunka, shaambada, saliida, iwm.)
- Dagganeyaasha waxay xaq u leeyahiin in ay qolkooda ku hasytaan qaar ka mid ah hantida shakhsiga, sida sawirada iyo warqadaha. Inta soo hartay hantidooda waxaa lagu hayn doonaa qol xeran iyo/ama sanduuq ammaan ah.
- Dagganeyaasha waxay xaq u leeyahiin kana madax banaan yihiin in la xakameeyo ama lagaaryeelo, haddii aysan khatar ku ahayn naftooda, dadka kale oo meesha degan, shaqaalaha ama Nabadgelyada hawsha ka socota dhimaha.
- Dagganeyaasha waxay xaq u leeyahiin in loo sheego iyo in ay isticmaalaan habka ashtakada.